SOMALI

**South King County Fund (Lacagaha Deeqda Koonfur King County)**

**Waa maxay ujeeddada lacagaha deeqdu?**

Dekedda Port of Seattle ayaa u aasaastay lacagaha deeqda South King County Fund si loogu horumariyo iskaashiyada salka ku haya sinnaanta iyo in loo fidiyo ilo iyo taageero jaaliyadaha taariikhi ahaan u adeeggoodu hooseeyay ee u dhow garoonka-diyaaradaha. Lacagaha deeqda ayaa bixin doona $10 milyan inta u dhexaysa 2019 iyo 2023 si wax looga qabto yaraynta dhawaaqa, caafimaadka bey'ada iyo joogtaynta jaaliyadahan dhaqan ahaan iyo dhaqan iyo qowmiyado ahaan kala duwan.

Iyada oo laga falcelinayo saamaynta wayeellada badan ee cudurka COVID-19 u ku yeeshay bulshadeena, Guddiga Dekadda ayaa ku biiriyay horumarin dhaqaale in takhasus dheeraad looga dhigo lacagaha deeqda South King County Fund. Iyada oo xiriir la leh dhammaan waaxaha dhaqaalaha muhiimka ah ee Washington iyo ku xirnaan in ka badan 500 loo-shaqeeye ka hawlgala goobahayga shaqada, Dekadda ayaa kaalin lama huraan ah ku leh inay horseed u noqoto soo kabashada deegaaneed.

**2020: Wareegga kowaad ee deeqda**

Lacagaha deeqda South King County Fund ayaa ka qaadata kaalin muhiim ah xeeladda soo kabasha deegaaneed ee Dekedda. Sannadkan, waxaan deeqo siin doonaa ururrada u adeega bulshooyinka sida aadka ah ay u saameysay dhibaatada dhaqaale ee haatan jirta looguna talagalay mashruucyada ku xiran meheradaha la xiriira Dekadda, oo ay ka mid yihiin meheradaha duullimaadka, badda, dhisitaan dhismaha, iyo shaqooyinka cagaaran (bad'baadada bey'ada iyo dhirta ku lug leh).

Dekeddu waxay hadda qananeysaa soo jeedinno ku saabsan wareegga koowaad ee deeq-lacageedka South King County. Xilliga ugu dambeysa ee soo jeedinta waa 12 duhurnimo duhurnimo (PT) Arbacada, Sebtember 30keed, 2020.

- $ 1 milyan ayaa loogu talagalay in lagu maalgaliyo mashaariicda ku jira wareeggan, lacag weyddiisashadu waa ilaa iyo $100,000.
- Natiijooyinka ka soo baxa mashruuca waa inay la xiriiraan horumarka shaqaalaha, barnaamijyada shaqo abuurka ama xalalka dib u soo kabashada dhaqaalaha ee la xiriira madaarka.
- Ururrada bulshada, rugaha ganacsiga, iyo ururada kale ee aan samafalka ah ee ka shaqeeya aagagga barnaamijkan ayaa uqalma inay codsadaan.
- Ururradu waa inay soo bandhigaan waaya-aragnimada ay u leeyihiin u adeegidda jaaliyadaha ee magaalooyinka u dhow-garoonka diyaaradaha ee inta ugu badan dhaqaale ahaan u nugul ee ay la soo wajahday caqabado waawayni.

- Hay'aduhu waa inay soo gudbiyaan soojeedin qoraal ah oo ay ka soo qaybgalaan dooda guddiga dib u geesita.

**Su'aalaha Badanaa La Weyddiiyo**

**Waa noocee ururrada la shaqeeya Madaarka?**
Haatan, Dekaddu waxay kula shuraakoowdaa ururrada barnaamijyo kala duwan, oo ay ka mid yihiin tababbarrada iyo ku meeleynta shaqada, xirfad-barashada hore, hormarinta iyo ku nagaadka shaqada, tababbaritaanka dhalinyarada iyo shaqaalaynta, ka taakuleyn farsameed meheradaha yaryar, kor u qaadista dalxiiska, caafimaadka bey'ada iyo hormarinta bulshada.

**Waa maxay shuruudaha uqalmitaanku?**
Codsadeyaashu waa inay noqdaan urur aan macaash doon ahayn ama urur leh kafaale-qaate dhaqaale:
- Urur u adeega kafaale-qaadida dhaqaaleahaan waa in u soo gudbiya soo jeedinta, intaa waxaa dheer in soo jeedinta u soo gudbiyo ururkooda kafaal-qaaday.
- Wadashaqeyntu way quseyn kartaa, laakiin urur samafal ah oo ka shaqeeya iskaashiga ayaa ah inuu soo gudbiyo soo jeedinta isagoo matalaya kooxda.Intaa waxaa sii dheer, soo-jeediyayaashu waa in ay soo bandhigaan waaya-aragnimada u adeegidda jaaliyadaha agagaarka garoonka diyaaradaha ee dhaqaalaha nugul isla markaana la kulma caqabado waaweyn, oo ay ka mid yihiin dadka midabka leh, Dadka Asaliga ah, soogalootiga iyo qaxootiga, kuwa afka Ingiriisigoodu xadidanayay, halyeeyada/ciidamada, waayeelka, dhalinyarada iyo / ama dadka naafada ah.

**Ma inaan ahaadaa urur aan macaash doon ahayn inaan codsado?**
Haa. Haddii ururkaagu uusan lahayn darajada aan macaash doonka ahayn, waxaad ku codsan kartaa adiga oo u mara kafaale-qaate dhaqaale ah urur aan macaash doon ahayn.

**Qofku shaqsi ahaan ma u codsan karaa?**
Maya, codsadayaashu waa inay ahaadaan ururro aan macaash doon ahayn, iskaashadayaal ama kuwo la kafaale-qaatay dhaqaaleahaan.

**Iskaashadayaasha midkood ma soo gudbin karaa soojeedin?**
Haa, iskaashadayaashu wey codsan karaan, laakiin ururka ku soo gudbinaya weyddiisiga magaca kooxdu waa inuu ahaadaa urur aan macaash doon ahayn.

**Qofku kaligiis ma dalban karaa?**
Maya, soo-jeediyayaashu waa inay noqdaan ururro aan-faa'iido-doon ahayn, iskaashi ama ururro masuuliyada iskaashiga qaadaya.

**Xafiiskeenu wuxuu ku yaal Seattle, laakiin bulshada aan kooxdeyda ay u adeegto waxay saldhigiisu tahay Burien. Ma dalban karnaa?**

Haa, illaa inta mashruuca la soo jeediyay uu diiradda saarayo u adeegidda dadka ku nool agagaarka garoonka diyaaradaha.

**Ma ku soo gudbin karaa soojeedintayda luqad ka oo aan ahayn Ingiriisiga?**
Dhammaan agabyada qoran ee soojeedinta waa in lagu soo gudbiyaa Ingiriisi. Hase yeeshe, waxaad ku samayn kartaa soobandhigga hadalka ah luqadda aad doorbideyso marka aad la doodeyso guddiga dib u eegista . Farxad ayay noo tahay inaan kuu diyaarino turjumaan.

**Miyay qasab igu tahay inaan ka qeybqaato wadahadalka gudiga dib u eegista?**
Haa. Wadahadalkaani wuxuu ku siinayaa fursad aad qof ahaan kalahadasho Gudiga Dib u Eegista Deeqda ku saabsan mashruucaaga. Kuwani shaqsi ahaan ama wada sheekaysiga tooska ahi waxaa ku jiraan - oo aan ahayn meelayn - soojeedin qoraal ah. Soo bandhigid ayaa lagu sameyn doonaa luuqada Ingiriisiga, turjubaanno ayaa la bixin doonaa. Haddii aad jeclaan lahayd turjubaan doodaada, fadlan noogu sheeg foomka dalabkaaga. Waxaan kula soo xiriiri doonnaa anagoo wakhti ka xulaneyna jadwalka jadwalka.

**Sideen ugu weyddiistaa turjubaan soo bandhigga dooda hadalka ah ee gudiga dib u eegista?**
Haddaad ugu baahantahay turjubaan soo bandhiggaaga hadalka ah ee guddiga dib u eegista, fadlan noogu soo sheeg foomka codsiga.

**Ma dhiibi karaa in ka badan hal soojeedin?**
Kaliya hal codsi ayaa urur kasta oo aan macaash doon ahayn loo oggol yahay, laga reebo haddii u ururka aan macaash doonka ahayni uu ugu adeegayo kafaala-qaate dhaqaale ahaan mashruuc kale.

**Intee le'eg ayay yay tahay inuu noqdo dhererka soojeedintaydu?**
Qaybta iska warranku waa ineyna ka badnaan lix (6) bog, laakiin haddaad noo sheegi karto sheekadaada bogag ka yar, sidaasina wey fiicantahay. Annagu ma raadinayno qoraal naxwuhu u dhammaystiran yahay. Kaliya si kooban noogu sheeg faahfaahinta ku saabsan waxaad qaban doonto. Xaashida cinwaanka, miisaaniyada mashruuca iyo lifaaqyada looma tirinayo xadka lixda-bog.

**Deeqaha ma waxa loogu talagalay kharashyada guud ee hawlgallada ama mashariicda?**
Deeqaha waxaa loo bixin doonaa kharashaadka la-xiriira mashruuca, ee ma aha qarashaadka hawlgalinta guud.

**Ma siindoontaan lacagaha deeqda mashaariicda hadda jirta jira?**
Haa, mashaariicda hadda jirta ayaa uqalma maalgalinta. Laakiin, maalgalintu waxay dabooli doontaa oo keliya howlaha dhacaya ka dib marka la fuliyo heshiiska deeqda.

**Haddii aan helno deeq, intee jeer ayaan u baahan nahay inaan soogudbinno warbixin?**
Waxa lagu weyddiisan doonaa inaad bixiso warbixin sannadka badhkiis ah iyo warbixin kama dambays ah.

**Goorma ayaan aan heli doonaa lacagah deeqda?**
Dhammaan deequhu waa kuwo laguu celin karo, taas micnaheedu waa inaad marka hore bixiso kharashaadkaaga kadibna aad u soo gudbiso qaansheeg Dekeda si dabateena laguugu soo cleiyo lacgta kharshka. Qaansheegyada ayaa la soo gudbin karaa had iyo jeer bil kasta oo waxaana la bixin doonaa marka la helo.

**Lacagaha deeqdu ma loo bixiyaa waqtiga shaqaalaha?**
Haa, lacagta deeq ayaa loo isticmaali karaa waqtiga shaqaalaha, kharashaadka tooska ah ama qandaraasleyaal-hoosaadka ka shaqeeya mashruuca.